**QORSHAHA BEDDELIDDA GURYAHA DADWEYNAHA**

HACSD waxay damacsan tahay in ay HUD ka codsato in ay dhaqaale ahaan ku soo celiso 121 guryaha dadweynaha ah, oo ku yaalla afar goobood oo ku yaalla magaalada Chula Vista (AMP CA108000001). Iyada oo loo marayo Qaybta/RAD 18 Small PHA Blend (Small PHA Blend) hab socodka HACSD wuxuu u rogi doonaa guryaha dadweynaha gargaarka tigidhada ku salaysan mashruuca. Haddii la ansixiyo Small PHA Blend, dhammaan dadka deegaanka ee xaqa u leh guryaha dadweynaha ee jira ayaa heli doona foojarro ku salaysan mashruuca (Project-Based Vouchers, PBVs) si ay ugu badalaan kaalmada kirada ee lagu bixiyo barnaamijka guryaha ee dadweynaha.

Waa ujeedada HACSD ee ah inay ilaaliso 121 unug oo ah kuwo la awoodi karo oo ah qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo aadna u hooseeya. Dhammaan dadka degani waxay xaq u leeyihiin inay ku sugnaadaan qaybta jirta iyagoo bixinaya kirada la awoodi karo. Waqti xaadirkan, waxaa la filayaa in dhammaan dadka deegaanka ee jira ay u qalmi doonaan PBV. Iyada oo loo marayo habka yar ee Small PHA Blend, illaa 80% unugyada, ama qadarka kale ee ay HUD aqoonsato, ee Mashruuca Beddelidda ayaa loo beddeli karaa foojarrada ilaalinta kireystaha (tenant protection vouchers, TPVs) oo lagu abaalmariyay iyada oo loo marayo ansixinta qodobka 18. TPV-yada waxaa loo isticmaali doonaa in lagu lifaaqo PBV-yada qaybta 18 unugyada iyada oo loo marayo habka aan tartan lahayn sida lagu qexay PIH Notice 2017-21. Unugyada kale waxay u bedeli lahaayeen PBV-yada ayadoo loo marayo habka Isu-duwaha Gargaarka Kirada (Rental Assistance Demonstration, RAD). Waxaa la filayaa in dhammaan qaybaha guryaha dadweynaha ay sidaas ku beddeli doonaan gargaarka PBV.

- Dadka deggan PBV waxay xaq u yeelan doonaan inay codsadaan Foojarka Doorashada Guriyeynta (Housing Choice Voucher, HCV) qaybta 8aad ee ku salaysan kireystaha oo ay ka dalbadaan inay la soo guuraan foojarkooda hal sano gudahooda marka isbedelku uu yahay mid buuxda oo ku filan maalgelinta. Qaybaha ay ka tageen qoysasku waxaa lagu buuxin doonaa liiska sugida ee PBV, oo lagu aqoonsaday Qorshaha Maamulka HCV.

Inkastoo aanay jirin dib u dejin aan qasab ahayn oo la filayo, HACSD waxay siin doontaa gargaar dib u dejinta taas oo loo baahdo.

Lahaanshaha 121ka unug waxaa lagu wareejin doonaa hay'ad sharciyeed oo gaar ah taas oo milki ahaan noqon doonta. HACSD waxay u badan tahay inay noqoto xubinta keliya ee hay'adda sharciga ah si ay u sii haysato danaha lahaanshaha ee hantida. Hay'ad madaxbannaan oo ansixisay HUD ayaa sidoo kale la xaqiijin doonaa si ay u qabato hawlaha maamul ee loo baahan yahay, sida go'aaminta macquulka kirada iyo kormeerka kirada. Marka la dhameystiro isbedelka, HACSD waxay xiri doontaa Barnaamijka Deganaanshaha Dadweynaha.

Ka dib markii la dhammeystiro Small PHA Blend iyo wareejinta guryaha, hay'adda sharci ee gaarka ah ayaa sii hayn doonta lahaanshaha halka ay sahamiso ikhtiyaarrada habdhaqanka suurtagalka ah ee afarta goobood. Hawlaha maan-dhaarinta waxaa lagu sameyn karaa iyada oo loo marayo iibinta ama sababta loo siinayo guri dhisaha awoodi karo. Guryahaasina waa kuwo la awoodi karo marka loo eego heshiiska degaanka ee waqtiga dheer.